Fulaygii wax-jeclaa

W/Q: Guy de Maupassant

Soomaaliyayntii: Bashiir Raacdeeye

@2011

Maxaa ka layaab badan xasuusihii hore!.waxay ku kaydsan tahay maskaxdeenna,waxay qodaysa gunta hoose ee laabteenna, ma awoodno inaan illowno maalinkasta oo ina soomarta.

Noloshaydii waxa isoo maray ummuuro fara-badan,qaar xanuun badan iyo kuwo farxad leh, qaarkood waxa ay ahaayeen dhacdooyin I cabsigeliyay.laakin, dhacdaadii hooyo kooshaliid weli kama ay guurin xasuustayda gaarka ah. Ma jirto maalin isoo marta ama waa ii berya ,illaa waan xasuustaa dhacdadii Hooyo Kooshaliid.

Waxay da'adaydu ahayd ku dhawaad 12 jir markii ay iman jirtay gurigayaga subax-kasta oo khamiis ah si ay noogu maydho dharka,…xilligaa waxaa aannu ku noolayn guri weyn oo meel miyi ah ku yaal,kaas oo u dhawaa Kinniisadda tuulada,waxa ay Hooyo Kooshaliid iman jirtay guriga dhaqan ahaan, 7;00 A.M, maalintii oo dhanna halkaas ayay joogi jirtay iyadoo maydhaysa dharka qoyska, waxa ay ahayd islaan da'a ah oo laangadhe ah, bara-baro ama haaro ayay ku lahayd sanka agtiisa iyo meelo kala duwan oo wajiga ah,timo xaad ah oo teedsan ayay lahayd ,ku was oo la moodo Gadh….

Anigu aad ayaan u jeclaa Hooyo Kooshaliid, iyaduna sidaas oo kale ayay I jeclayd, waxay iga sheekayn jirtay sheekooyinka tuulada

aannu degannahay ka dhaca.waxay ii keeni jirtay bogos ama xidhmo mac-macaan ah oo ay markasta jeebkeeda ay ka soo saarijirtay.

Sidii caadada u ahaan jirtay, subax ayaa ay timi guriga,subaxaas oo ah Khamiis, anigu waxaan u raacday qolka ay dharka ku maydhayso sidii caadada ii ahaan jirtay si aan ugu raaxaysto sheekooyinkeeda iyo mac-macaan-ka ay isiin jirtay.laakiin, waxaan waagaas la kulmay wax iga murugaysiiyay.Waxaan arkay iyadoo ku dhacday dhinaca kursigeeda oo ay dhudhumaheedu kala fidsan yihiin , dhulkana taal!.qalladaydii iyo oohintaydii markay waalidkay maqleen ayay soo baxeen,waxay la kulmeen dhacdada cabsida iyo murugada leh ee meesha ka dhacday, ka dib si dhakhsa ah ayay waaliddiintay u raadinyeen dhakhtar da'a ah oo tuulada joogay,in daqiiqad ka yar,markuu baadhayay Hooyo Kooshaliid,waxa uu sheegay inay dhimatay,wadnuhuna is-taagay.

Markii arinkaasi dhacay ayaan is hayn waayay oohin iyo murugo.waxaan u cararay anigoo murugaysan qolka fadhiga.koone cidla ah ayaan kursi u qaatay oo maddow ah,halkas ayaan keligay fadhiistay anigoo ooyaya.

In yar ka dib,waxa qolkii soo galay Hooyadday,Abbahay iyo Dhakhtarkii.waa ay fadhiisteen.waxay bilaabeen inay sheekaystaan iyagoo iska sharaabbayaa.saddexdooda mid koodna ima uu arkayn inaan faadhiyo koone yar oo maddow oo qolka fadhiga ka mid ah,taas daraadeed, ayaan fursad uga helay inaan maqlo sheekada Hooyo Kooshaliid.

'Dhakhtarkii da'ada ahaa ayaa yidhi; miskiinad ayay ahayd Hooyo kooshaliid. Addin ayay ka jabtay laba casho ka hor imaatinkaygii tuuladdan.weli waaan xasuustaa dhacdaddii beddeshay nolosheeda oo idil.waxaad mooddaysa inay shalay dhacday oo kale.hadda na, waxa laga jooga inka badan 40 sano'.

“illaahayow.. maxay dharaaruhu samaynayaan!. Waxa jirtay xilli ay ahayd 17 jir Qallanjo ah. Jidhkeedu isu dheelli-tiran yahay!.quruxdeeda qofka arkaa aanu ka jeesanayn!. cid hore ugama sheekayn sheekada Kooshaliid.cid aan aniga ahaynna ma oga sheekada Kooshalliid,marka laga reebo qof meel fog ku nool!.”

“Kooshaliid gashaantinimadeedi, waxay ka shaqayn jirtay iskuul ku yaal tuulada.Waxa lagu magacaabi jiray iskuulka ‘Miisiyo Jaaribo’.waxa iskuulka kala shaqayn jiray wiil lagu magacaabi jiray’Sayjabarooto’.waxa uu ahaa wiil aad bilicsan .Hadal macaan leh.taas darteed, ayay hablaha tuulada midkastaa ugu riyoon jirtay sidii ay u guursan lahayd.balse uma suurto gelin inay middina nasiib u yeelato inay guursato .wiilku se waxa uu la dhacay, quruxda iyo qallanjanimada Kooshaliid.Waxa uu u bandhigay jacaylkiisa isagoo muujinaya sida uu uga helay.taas oo noqotay arin dabiiciya inay la wadaagto jacayl Sayjabaroot.waxay aqbashay iyadoo aaminsan oo deggan inay fuliso ballanka ay la dhigatay saaxiibkeed oo ah ballan iyaga u gaar ah.Meesha ay ku ballameen waxay ahayd qolka nasashada oo aad u weyn kaas oo ku yaallay dabaqa labaad ee iskuulka marka ay ardayddu iyo macallimiintu rawaxaan”.

Xilligi ay ballantu ahayd markii la gaadhay, Kooshalliid waxa ay iska dhigtid mid rawaxaysa, laakiin may tegin ee waxa ay kortay dabaqa 2aad ayadoo ku dhumatay qolka nasashada ee aad ka weynaa. Saaxiibkeed ayaa halkii ugu yimi isagoo se ka cabsoonayaa mulkiilaha iskuulka oo lagu magacaabo “Miisiyo Jaaribo. Balse, waxa dhacday wixii uu ka baqayay inay dhacaan iyagoo aan kulmin lammaanihii is jeclaa. Al-baabkii ayaa furmay, Mulkiilhii ayaa soo galay isagoo qaylinaya oo leh,” maxaad halkan ka samaynaysaa Sayjabarootow?!”

“inyar ayaan nasannayaa” ayaa wiilkii dhallinyarad ahaa yidhi. Ka dib, Kooshalliid ayuu la xanshaashaqay isagoo leh,” waxa kugu haboon inaad ku dhuumato miiskan weyn dabaddiisa…. Dhakhso!”

Waxay u muuqatay in uu mulkiilaha iskuulku maqlay xanshaashaqaas. Hase ahaate, suurtogal uma ay ahayn inuu arko qofka meesha ku jira mugdiga darteed. Markale ayuu ku qaliyay (mulkiilihi) barihii dhallinyarada ahaa isagoo leh, “ yaa kula jooga Sayjabarootaw? Ma tihid keligaaye?”.

Sikastaba ha noqotee, sayjabaroot, waxa uu isku dayay inuu ka dhaadhiciyo mulkiilaha inuu keligii goobta ku sugan yahay.laakiin mulkiilihii ayaa yidhi, “ sifiican! Aniga laftayda ayaa baadhidoona!”.

Ka dib, toosh ayuu raadsadday isagoo dusha qaful kaga xidhay al-abaabkii qolka si uu u baadho cidda ku wehelisa sayjabaroot goobtan!

Isagoo ahaa wiilkani mid fulay ah sida dhallinyarada ayniggiisa ah ee ku caan baxdday jilidda cishqiga isla markiiba , waxa ku billaabmay naxddin iyo is hayn-waa, werwerkiina waa ku batay, wajigiisiina waa uu is-beddelay. Cod ay naxddini ka muuqato ayuu kula haddlay saaxiibaddii ,” ku dhuumo miiskan hoostiisa Kooshalliiddeey, eebbe ayaan kugu dhaarshee! Haddii uu iga kaa arko mulkiilluhu;shaqada ayuu iga eryayaaye, calafkana (risiqa) waa uu iga xarimaya! Taasina waa faddeexad weyn oo burburinnaysa aayahayga oo dhan!

Inantii ayaa tidhi iyadoo deggan “ haddii aad u sheegan lahayd (mulkiilaha) inaad I jeceshahay. isla markaas-na, aad doonnayso inaad I guursato..” se hadalkii ayaa uu ka soo dhexgalay isago leh,” maya… wakhtigan ma’aha munaasib in aynu ka fekerno guur…alla!… alla! Waxaan maqlayaa sanqadha tallaabaddiisa’e… dhuumo!..dhuumo!.. dhakhso! … illaahay ayaan kugu dhaarshay!”

Inantu waxay dareentay xaqiraad kolka uu sidaas ku lahaa saaxiibkeed,waxaynu ku tidhi.” Ma dhuumannayo… balse daaqadda ayaan ka booddayaa. Waxaan rajaynayaa inaad ii timaaddo kolka uu mulkiilaha iskuulku tago oo aad igayso cisbitaalka si lay dabiibo!”

Intii uu maamuluhu furayay al-baabka, ayay kooshalliid ka boodday daaqadda ama dariishadda dabaqa 2aad, waxayna ku dhacdday waddada beerta marta oo xagga danbe ee iskuulka ku taal! Sidaas ayaa uu mulkiilhii iskuulku ugu guul-darraystay inuu helo qofka labaad ee meesha ku jiray, isla markaasna ku laabtay halkii uu ka yimi.

Kolkay intaasi dhacdday, ayuu sayjabaroot u soo cararay gurigayga si aan u caawiyo saaxiibaddii oo ahayd gashaanti kala shaqaynaysay dugsiga. Habeen kaas waxa da’ay roobab muhiigaan ah aadna way u qaboobayd.haddana , waxaannu nimi dugsiga xaggiisa danbe iyadoo inantii miskiinta ahayd gidaarka ku tiirsan. Addin ayay ka jabtay.wax erey ahna may odhan intii aannu qaaddaynay. Laakiin jidka kolkaannu ku sii jirnay ayay tidhi, “ waxaan helay abaal-gudkaygii!.... Haa!....waa kaa abaalka gashaantikasta oo qalanjo ah isla markaasna; jecel will dhalanteed ah!”

Tuulada waxaannu u gellinnay inay shil baabuur ku dhawaacantay, darawalkii gaadhiga oo fulay ahaa awgeed uu iskaga degay gaadhiga oo waddada badhtankeeda maraya!

Beentaas caad ayaa dadkuna aaminay! Ciidanka booliskuna dedaal ayay ku bixiyeen sidii ay u soo qaban lahaayeen darawalka been-beenta ah!

Ka dib markii uu dhaawac soo gaadhay aan ka hadhayn nolosheeda oo dhan, ayaa uu Sayjabaroot usoo bandhigay ‘guur’, way se ka diidday. Sababta ay u diidday, ayaa hayd inaanu guursanayn ilaa uu noqdo hantiile!

Waxa laga yaabaa, in jacaylka ay u qabtay Sayjabaroot ay kala kulantay xaqiraad iyo yasid. Ay sababtu tahay, kolkii uu diidday inuu ka horcaddaysto mulkiilaha iskuulka jacaylkiisa iyo inuu guursan-doono. Waxay nafteeda u hurtay sidii ay badbaaddin lahayd Sayjabaroot!

Kooshaliid waxay nafteed u biimaysay inay ilaaliso ayaayaha Sayjabaroot, xittaa waxay u hurtay mustaqbalkeedii iyo farxadda nolosheeda. Waxay ay geeriyootay iyadoo ah:quruxley keli ah, qofna aanu ka daba ooyayn ama dhaxlayn!